

# Waalidku xataa Wuu Tiriya

## Ka caawinta ilmahaaga – Cabiraarada dhererka iyo bedka


Carruurtu waxay wax barataa markay ciyaarayaan. Waxay wax ka baran karaan dhererka iyo bedka iyo khalad iyo saxba iskudeyaya waxyaalaha sida looxda googo'an, dunta, cajiinta wax lagu qaabeeyo iyo alaabta lagu ciyaaro ee wax lagu dhiso.

Isla markay ciyaarayaan, carruurtu waxay bilaabaan inay ogaadaan xajmiga iyo qaabka alaabta; siday alaabtu isugu haboon yihiin, sida laysu dul saari karo, dhererka iyo balaca alaabta. Carruurtu waxay u baahan yihiin in la dhiirigeliyo si ay u sahamiyaan oo ay u gu shaqeeyaan alaabta ka hadal waxyaalaha ay helaan.

### Sidee bay carruurtu ku bartaan inay cabiraan dhererka iyo bedka?

Carruurtu bilow ahaan waxay yeeshaan fahamka cabiraada iyagoo isbarbar dhigaya alaabta. Waxaa laga yaabaa inay kor u qaadaan laba loox oo yar yar oo ay yiraahdaan mid baa ka dheer ama ka gaaban ka kale. Isla markiiba wax yar ka dib, waxay bilaabayaan inay is barbar dhigaan laba alaabood wax ka badan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay ciyaaraan oo ay tijaabiyaan qalab iyo alaabo kala duwan si ay ugu cabiraan alaabta, intayna u gudbin isticmaalka halbeegya *tooska* ah sida mitirka ama sentimitirka. Waxay u baahan yihiin inay cabiraan dhererka miiska tusaale ahaan, isagoo isticmaalaya qoryaha maryaha lagu qabto marka la wadhayo, qaadooyin ama buugag ama taakooyin ka hor intuuusan isticmaalin mastarada.



# Waalidku xataa Wuu Tiriya

## Maxaad ku qaban kartaa guriga?

- Isticmaal canjiinta lagu sameeyo qaababka si aad u sameeyso “laba mas” oo kala dherer duwan. Ka hadal inuu hal mas “ka gaaban yahay” iyo in ka kale “ka dheer yahay.”
- Dulundulcee laba mas oo isku dherer ah oo aad ka sameysay canjinta qaababka laga sameeyo. U rog mid sagsag ama mas qalooqa. Weydii ilmahaaga, *maskeebaa dheer?*



- La dul raac oo kusawir gacanta ilmahaaga ama cagta kaar ka dibna jar. U isticmaal tan si aad ugu cabirto dhererka waxyaalaha sida miiska ama sariirtiisa ama teeda. Ka hor intaadan cabirin, dhiiri geli ilmahaaga inuu maleeyo inta “gacmood” ee ay noqoneyso sariirtu.
- Dulundulcee gaariga lagu ciyaaro meel degaandeg ah ka dibna cabir inta dherer ee gaari ee uu safray
- Ku wareeg oo ag soco alaabta kana hadal inta talaabo ee ay qaadato
- Ku dinwaangeli kororka ilmahaaga shaxanka dhererka
- Isbarbardhig dhererka xubnaha qoyska kana hadal ka “ka dheer” iyo “ka gaaban”.
- Isticmaal ul inaad ku cabirto fogaanta markaad abuureyso miraha.
- Cabir bedka qayb ama miiska dulshiisa adoo isticmaalaya waraaqaha wargeyska. Tiri imisa intee warqadood ayaa loo baahday si loo wada daboolo bedka.
- Sawir muuqaal feegaar ah ama samee muuqaal feegaar ah adoo isticmaalaya xarig lagu kooleeyey warqad. Sawir gudaha bededka “xiran”

# Waalidku xataa Wuu Tiriya



- Ku fidi warqad wargeys dhulka tirina inta buug oo korkeeda ku filan ama buuxin karta.
- Markaad duuduubeyso hadiyadaha ka hadal xajmiga warqada iyo haddii warqadu ay balaar iyo dherer ku filan leedahay.
- Ka hadal xajmiga marada miiska ee loo baahan yahay inay dabooshomiis ama waxo lagu daboolo gaariga.
- Fiiri bedka lagu tilmaamo inuu daboolayo qasacyada rinjigu ka hor intaadan wax rinjiyeyn. Ka hadal inta qasac oo rinji ee aad u baahaneyso.
- Ururi waraaqaha layska tuurayo oo bidabeysan iyo waxoogaa qasaacyo maran ah ama karaatiin yar yar sida kuwa sanduuqyada siiriyaalka .Ilmahaagu wuxuu abuuri karaa qaab midab badan isagoo ku kooleynaya warqad kartoona ama qasaaca si uu u wada daboolo.